Oregon Department of Human Services
Express Payment & Reporting System (eXPRS)

# Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah (EVV) ee loogu talagalay Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed ee DD (PSWs)

# Guudmarka Macluumaadka ee EVV

*(v5; 4/21/2019)*

## *Waa maxay Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah (EVV)?*

Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga, ama "**EVV**", waa qayb ka mid ah sharciga cusub ee federaalka kaasi oo caddeyn sax ah oo waqtigeedu dhab yahay uga baahan yahay dhammaan adeegyada shaqaalaha daryeelka & daryeelka shakhsi ahaaneed medicaid dhaqaalihiisa bixiso ee ku lugta leh booqashada guriga ee daryeel bixiye sameeyo waqtiga uu adeegyada helo qofku.

Sharciga cusub ee federaalka waxaa loo yaqaanaa Xeerka *21st Century Cures Act*, waxaana Diisambar 2016-kii ansixiyay Congress-ka Maraykanka.

Xeerka *Cures Act* ayaa tilmaamaya in nidaamyada EVV ay qabtaan macluumaadka soo socda **waqtiga adeegyadu dhacayaan**:

- **QOFKA** helaya adeega
- **NOOCA** adeega la bixiyay
- **TAARIIKHDA** adeega la helay
- **WAQTIGA** adeegu Bilaabmo isla markaana Dhammaado
- **BIXIYAHA** adeega
- **GOOBTA** adeega

ODDS waxay isticmaashaa Nidaamka Lacag Bixinta (**eXPRS**) ee loogu talagalay oggolaanshaha & biilashada adeegyada la siiyay dadka qaba I/DD ee ku nool Oregon. Inkasta oo eXPRS ay isla hadaba ururiso inta badan xogta macluumaadka loo baahan yahay, ma aysan soo ururin dhammaantood.

eXPRS ayaa la cusbooneysiisay si loo soo ururiyo **DHAMMAAN** macluumaadka EVV ee loo baahan yahay. Cusbooneysiintani cusub ee lagu sameeyay eXPRS waxay u PSW u saamixi doontaa in uu isticmaalo qalabka gacanta 'mobile device' si uu waqtiga uu shaqeeyay u geliyo, isla markaana la isku soo ururiyo dhammaan macluumaadka biilka SD ee loo baahan yahay

- **waqtiga** uu shaqeynayo & bixinayo adeegyo ***ISLA MARKAANA***
- qabtaan/keydiyaan **goobta** halka adeegyada la bixiyay Ka Bilaabmaan & Ku Dhammaadaan.

## *Qaarka mid ah ereyo cusub oo ay tahay in Daryeel bixiyayaasha PSW ogaadaan.*

Iyada oo ay jirto cusbooneysiinta cusub ee lagu sameeyay eXPRS si loo taageero EVV, waxaa jira ereyo cusub oo dhowr ah oo ay tahay in daryeel bixiyayaasha PSW ogaadaan.

**eXPRS Desktop**

waa erey loo isticmaalo sharaxaadda *website-ka caadiga ah ee eXPRS* ee daryeel bixiyayaasha PSW ay hadda isticmaalaan si ay galaan & fiiriyaan dhammaan macluumaadkooda la xiriira eXPRS, oo ay dheertahay macluumaadkooda biilka SD & wakhtiga safarka shaqo. **eXPRS Desktop** wuxuu ku fiican yahay in laga isticmaalo kambiyuutarka weyn ee caadiga ah ama laptop-ka.

**eXPRS Mobile-EVV**

waa erey loogu talagalay marka eXPRS la cusbooneysiiyay laga isticmaalo qalabka gacanta, sida telefoonka casriga ah 'smartphone' iyo tablet-ka (*ma aha marka laga isticmaalo kambiyuutar ama laptop-ka*).

**** MUHIIM AH:** ***eXPRS Mobile-EVV*** ***ma aha*** *nidaamka 'app' ee aad ka soo dejiso/min-guuriso qalabkaaga gacanta*. Waa website-ka caadiga ah ee eXPRS ka la cusbooneysiiyay si uu ugu shaqeeyo qalabka gacanta 'mobile device' ee loogu talagalay adeegyada EVV. PSW waxay geli doonaan ***eXPRS Mobile-EVV*** iyaga isticmaalaya halka internet-ka laga gelo 'internet browser' ee qalabkooda gacanta *(sida Safari, Chrome, Firefox, Edge, Silk, iwm.)* iyaga oo isticmaalaya website-ka caadiga ah ee eXPRS.

**Adeegyada La bixiyay** ama Gelinta Biilka "**SD**"

waa macluumaadka taariikhda/waqtiga uu PSW shaqeeyay taas oo la geliyo xaashidiisa shaqada "timesheet". Waxaa ku jira adeega iyo **Taariikha** + **waqtiga Bilawga & Dhammaadka** ee PSW shaqeeyay. Macluumaadka **biilka SD ee la geliyo** waxaa isticmaasha eXPRS si loo sameeyo sheegashooyinka loogu talagalay in lacag dib loogu siiyo PSW taasi oo ah waqtiga uu shaqeeyay.

**Hay'adda Maamulida Kiiska** ama **CME**

waa erey guud oo loo isticmaalo in ay lagu sharaxo Barnaamijka Naafanimada Korriinka Bulshada (CDDP), Ganacsiga DD ama Barnaamijka Adeegyada Carruurta ee Guriga Dhexdiisa ee Ballaaran (CIIS). CDDP, Ganacsiga & Barnaamijka CIIS dhammaantood waa Hay'adda Maamulida Kiiska (**CME**).

## *Miyay EVV beddeshaa sida uu PSW u diro biilasha shaqada uu qabto?*

Waxaa jiri doona isbeddel yar yar oo ku imaan doona sida PSW u diro biilasha loogu talagalay adeega uu bixiyo. Isbeddelada qaarkood waxay nidaamka biilka ka dhigi doonaan mid u sahlan PSW.

- PSW waxay geli doonaan ay waqtiga ay shaqeeyeen ee bixinta noocyada adeegyada Shaqaalaha Daryeelka kaasi oo ah***waqtiga*** ay Bilaabaan & Joojitaan shaqada (oo waqti dhab ah). Tani macnaheedu waa in aanu jirayn in hadda ka dib la sugo in PSW uu guriga aado ama dhammaadka muddada lacag bixinta si loo geliyo dhammaan macluumaadka xaashiyaha shaqada "timesheet" ee PSW ee loogu talagalay noocyada adeegyada Shaqaalaha Daryeelka. **eXPRS Mobile-EVV** waxay samayn doontaa & keydin 'save' doontaa ***qoraalka*** biilasha SD ee la geliyo ee loogu talagalay PSW iyada oo si toos ah & dhaqso ah loogu keydinayo eXPRS.

- **<u>Adeegyada looga baahan yahay EVV</u>** waxaa loogu talagalay Shaqaalaha Daryeelka:
    - **OR526** – Shaqaalaha Daryeelka
    - **OR526/ZE** – Shaqaalaha Daryeelka 2:1 shaqaalaha
    - **OR507** – Daryeelka Gargaarka Maalin kasta
    - **OR502** – Qorshaha Gobolka ee Daryeelka Shakhsi ahaaneed
- Biilka SD la gelinayo ee loogu talagalay adeegyada PSW kale ee *<u>aan u baahnayn</u>* EVV waxaa website-ka **eXPRS Desktop** loo gelin doono si la mid ah sidii hore. Kuwan adeegyada PSW ee ***aan ahayn EVV*** waa:
    - **OR004**-Masaafada Gaadiidka
    - **OR401**-Taageerada Shaqaaleynta ee Tababarka Shaqada
- PSW weli way u baahnaan doonaan in ay gelaan website-ka **eXPRS Desktop** si ay gudbiyaan ***<u>DHAMMAAN</u> qoraalkooda*** biilasha SD ee la geliyo ee ay rabaan in lacagtooda la siiyo. Tani waa ka mid ah adeegyada biilkooda la diray ee ah EVV iyo ka aan ahayn EVV labadoodaba.

- PSW waxay u baahnaan doonaan in ay daabacaan xaashiyaha shaqada ee loogu talagalay cidda aad u shaqeyso si uu u fiiriyo isla markaana u saxiixo, ka dibna xaashiyahan shaqada oo saxiixan **CME**wax oggolaanaya ugu keenaan taariikhaha kama dambeysta ee loo qabtay qabashada hawsha mushaharka/xaashida shaqada dhexdeeda. Shaqadani waa mid la mid ah sidii hore; ***<u>ma jiro isbeddel ku imaanaya qaybtan nidaamka/biilka/xaashida shaqada ee PSW</u>.***

- PSW waxay sii wadi doonaan in ay jeegagooda/lacag dhigashadooda tooska ah ka helaan shirkadda mushaharka ee FMAS (**LLC**) ee loogu talagalay dhammaan waqtiga la shaqeeyay & hawsheeda lagu qabtay eXPRS. Mar kale, tani waa mid la mid ah sidii hore; ma jiro isbeddel ku imaanaya qaybtan nidaamka hawl qabashada.

## *Sidee buu nidaamkan cusub ee eXPRS Mobile-EVV e shaqeeyaa?*

PSW waxay gali karaan tilmaanta dhanka taageerada oo tallaabo-tallaabo ah oo ku saabsan Sida "***How To…***" loo isticmaalo qaababka**eXPRS Mobile-EVV**. Waxaa jiri doona kulamo tababar oo shakhsi ahaan ah oo ay heli karaan PSW isticmaalaya EVV.

## *Ka waran su'aalaha kale ee laga yaabo in ay PSW hayaan?*

Waxaa jira dokumentiga Su'aalaha Inta Badan La Iska Isweydiiyo (FAQ) Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah (EVV) oo ay heli karaan PSW kaasi oo hadla/daboola su'aalo badan oo laga yaabo in daryeel bixiyayaasha PSW ay ka qabaan Hirgelinta EVV.

Macluumaadka dheeraadka ee EVV ayaa sidoo kale laga heli karaa website-ka <u>Mashruuca Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah ODDS</u>.

Su'aalaha ama walaaca jira ee kale ee EVV waxaa email ahaan loogu soo diri karaa ODDS: <u>ODDS.EVV@state.or.us</u>.